YOU STOP THE SPREAD



# Ka-hadlidda Badqabidda Carruurta Iskuulka Dhigata

**(Speak Up for Keeping Kids Safe and In School)**



### Iskuulka iyo hoggaanka dadweynaha ogeysii sida loo sii wadi karo baqabidda carruurta si mudnaanta koowaad looga dhigo iskuulka oo furnaado oo maalintii la yimaado.

Waalidiin, masuul, iyo macallimiin badan oo jooga Wisconsin ayaa rumeysan: in uu xanuunka faafaya ee COVID-19 dhib weyn ku hayo carruurta. Waxa uu caqabad ku noqday kobocoodii waxbarsho iyo bulsho ahaaneed. Waxa kale oo muhiim ah in la xusuusnaado in iskuullada la xirayo ay si gaar ah dhib ugu yihiin carruurta naafada ah, carruurta ku nool saboolnimada, iyo carruurta dadka tirada yar ee ah ku nool Wisconsin. Marka iskuulka la imaanayo ardeyda oo dhan ayaa haysata fursado waxbarasho.

Carruurta oo dhan ayaa iskuulka ku hela wax kale oo aan ahayn waxbarasho. Marka iskuulka la imaanayo waxa kale oo lagu haystaa:

- Kobcinta aqoonta shucuurta bulshada
- Jimicsiga jirka
- Helidda caafimaadka dhimirka iyo adeegyo kale oo taageerid ah
- Adeegyada muhiimka ah ee cuntada iskuulka waa raashin caafimaadka u fiican
- Goob lagu haysto badqabid iyo waxbaris la isku taageerayo
- Helidda qalabka teknoolajiga iyo intarnet
- Waxbarashada oo ku fiican, oo dhug loo yeelanayo marka iskuulka la yimaado

## Waxa Aad Sameyn Karto

Wixii walaac ah u soo sheeg maamulka iskuulka oo wax weyn ka qaban kara. Waa in aad taageerto wax kasta oo u fiican carruurta, macallimiinta, iyo shaqaalaha kale ee iskuulka. Hoos ka akhriso waxyaabaha fiican ee la sameyn karo:

- Dadka in aad la wadaagto in aad taageersan tahay tallaalka, shuruudaha gafuurxirka, iyo in laga qeybqaato habka baarista ee iskuulku hayo
- In aad la socoto sharciyada la raacayo ee iskuulka iyo mar kasta taxaddarka COVID-19 ee la iska rabo
- Ka qeybgal ururka waalidka ee PTA
- Imow kulanka guddoonka iskuulka – ka hadal oo fikradahaaga u soo bandhig
- Waraaqo u dir guddoonka iskuulka, qof kasta oo ka mid ah xubnaha guddoonka, ama wargeyska



## Iska hubso in aad qowmiyaddaada u sheegto...

Qoysaska Wisconsin waxa ay ogyihiin in waxbarashadu iskuulka ku fiican tahay. Daraasado badan ayaa lagu ogaaday in ay yar tahay sida uu COVID-19 ugu faafayo iskuullada, oo aysan la mid ahayn sida dadweynaha kale marka la raaco siyaabaha kala duwan ee looga hortago faafidda xanuunka. Marka badqabid lagu haysto iskuullada, waxa badbaadaya waa carruurta iyo macallimiinta.

Waa in la sameeyo qorsheyaal badan si ay iskuullada maalintii u furnaadaan. Haddii uu qof kasta sameeyo waxa laga rabo, iskuullada ayaa maalintii la imaanayaa, oo carruurtu si fiican ayey wax u baran karaan iyagoo haysta badqabid.

**Iskuullada iyo hoggaanka bulshada:**

- **Waa in ay gacan ka geystaan qaadashada tallaallada COVID-19 ee 5 jir iyo wixii ka weyn** — Wax dhib ah ma laha, waa shaqeynayaan, oo waa ka-hortegidda ugu fiican ee lagu joojin karo faafidda
- **Waa in ay shuruud ka dhigaan gafuurxirka iskuulka iyo goobaha kulanka dadweynaha** — marka ay ardeyda, shaqaalaha, macallimiinta, martida, iyo dadka kale isticmaalaan gafuurxirka, difaac ayey ka helayaan kuwa tallaalan iyo kuwa aan tallaalneyn
- **Waa in ay iska hubsadaan calaamadaha COVID-19** — Waalidka iyo masuulku waa in ay ilmaha baaris geeyaan haddii ay u maleeyaan in ilmaha la qaadsiiyey xanuunka oo waa in ay ilmuhu guriga joogaan marka ay xanuunsadaan ama khatar ku jiraan
- **Waa in ay raacaan qosheyaal dheeraad ah** — Waxaa ka mid ah hawada gudaha oo la hagaajiyo, in la kala fogaado, iyo dhaqista gacmaha

**Waalidka iyo masuulka:**

- **Waa in ilmaha lagu soo duro tallaalka** COVID-19 iyo xoojiyaha marka ay xaq u leeyihiin
- **Waa in ay ilmaha kala hadlaan** isticmaalidda gafuurxirka in ay muhiim u tahay si loo aado iskuulka iyo meelaha kale
- **Waa in ay oggolaadaan** in ilmaha lagu sameeyo baaris haddii iskuulka loogu hayo baarista
- **Waa in ay raacaan karantiilka** oo ay ilmuhu guriga joogaan haddii ay xanuunsan yihiin

Badqabidda iskuulka waxay muhiim u tahay dadweynaha oo dhan. Marka iskuulladu furan yihiin oo lagu badqabi karo, waalidka iyo masuulku shaqooyin ayey aadi karaan — oo markaas dhaqaalihii gobolka ayey sidaas u fiican tahay. Marka ay dadku xoogga wada saaraan badqabidda iskuulka waxaa naga yaaraanaya heerka faafidda xanuunka — oo culeys kuma imaanayo daryeelkii caafimaadka iyo dhaqaalahii bulshada.

Waxa muhiimka ah waa in la iska difaaco COVID-19 iyo faracyadiisa cusub. Iskuulladu waa in ay la shaqeeyaan shaqaalaha caafimaadka dadweynaha si ay ula socdaan faafidda iyo wax kasta oo ku caawinaya heerka xanuunka si ay u go'aansadaan sida ay u difaaci karaan ardeyda, shaqaalaha, dadka isu xilqaama, iyo qof kasta oo iskuulka soo booqda.

### Faahfaahin raadso

Wixii dhab ah u sheeg oo ha la socdaan qoyskaaga iyo dadka kale. Xogta ugu dambeysa ee COVID-19, talooyinka saxda ah ee badqabidda, iyo wax ka badan ka eego http://dhs.wisconsin.gov/covid19.

WISCONSIN DEPARTMENT of HEALTH SERVICES

P-03176SO (01/2022)